



Barnmorskemottagningar

Patientinformation: GBS under graviditet översatt till somaliska

Datum: 2025-07-03

GBS mudada uurka laleeyahayunder g

Koox B streptokocker

Koox B-streptokocker, kuwaas oo loo soo gaabiyo GBS. Waa nooc bakteeriyada ah oo ku jira mindhicirada si dabiici ah. Waxaa ay mararka qaarkood bakteeriyadaasi gudaha u gashaa xubinta taranka ee haweenka (siilka)s ama kaadi mareenka, waxaa sidoo kale ooa ay inta badan ku jirtaa bakteeriyadaasi maqaarka. Saddex meelod meel dhamaan haweenka ku jira da'da wax lagu dhli karo ayaa waxaa ay GBS kaga jirta macdanta/xagga hoose iyad oo haba yaraate wax dhiba u keenin. Hadaba maadaama mid inta badan caadi u timaada waxaa loo arkaa nooc –aadi ah ee looma arko xaalad cudur. Imaanshaha bakteeriyada wax shaqo ah kuma laha haba yaraatee nadaafada macdanta haweenka/xagga hoose ee haweenka kumana xidhna in aan si fiican la isku dhaqin ama nadiifin. Cid kalena lam qaadsiiyo, isla markaana looma arko GBS in ay tahay xanuunada gala xubnaha taranka.

GBS iyo mudada uurka

Majooratiga haweenka uurka leh ee sida GBS uma keento wax dhibaato ah haba yaraate, caruurta ay dhalaana waxaa ay ku dhashaan caafimaad. Marxalado dhif ah ay bakteeriyadu sababtaa infakshan ku dhaca kaadi

mareenka, kaas oo keena hafeef marka la kaadshayo iyo in la kaadsho marar badan.

Waa caadi in laga helo kaadida cadad yar oo bakteeriyada GBS ah iyada oo haba yaraatee aan sababin wax infekshan ah oo ku dhaca kaadi mareenka. Marka ay dhacdo marxalad noocaas oo kale ah lama siiyo qofka waxa antibiyootig ah. Waxaa taas ugu waacan iyada ay aad u adagtahay in jidhka lagag saaro bakteeriyada haddii la isticmaalo antibiyootig, bakteeriyadu waa ay soo noqnoqataa marar badan. Haddii mara badan la adeegsado daweyo antibiyootiko waxaa uu qofku halis ugu jiraa in bakteeriyada ku jirta jidhkiisu la qabsato antibiyootiga (in ay noqoto mid iska caabin karta antibiyootiga). Teeda kale ma jirto wax cadeyn ah marka ay bakteeriyada jidhka gasho in haddii la isticmaalo antibiyootik "uu wax caawinayo" ama ka hortagayo cudurka.

Antibiyootiga marka ummulinta

Waxaa taa bedelkeeda la doorta in la isku taxalujiyo marka la ogaado in haweeneyda jidhkeeda ay ku jirto bakteeriyada GBS la siiyo antibiyootiko kaliya marka ay haweeneydu ummuleyso.

Daawada (penicillin, haddii ay PC ku tahay aleerjig waxaa la siiya nooc kale oo antibiyootig ah), waxaa laga siinayaa xididka lixdii saacadoodba mar mudada lagu gudo jiro hawlaha ummulinta.

Sababta loo doorbido in sidaan oo kale loo daweyo waa maadaama ay GBS mar- mar dhif ah sababto in ilmaha uu ku dhaco infekshan, taas oo keeni karta in ilmuhu aad u xanuunsado.

Waxaa loo arkaa in bakteeriyada loo gudbin karo ilmaha mudada lagu gudo jiro wakhtiga ummulinta, marka uu ilmuhu soo dhaafayo xubinta taranaka ee haweeneyda. Sidaas awadeed ayaan loo siin antibiyootig marka la qorsheeyo in hooyada lagu qalo ilmaha, waayo markaa ilmuhu ma soo dhaafaayo(marayo xubinta taranka ee haweeneyda.

Ilmaha dhasha ka hor wakhtigii loogu talogale waxaa uu hali weyn ugu jiraa in uu xanuunsado/jirado. Sidaa awadeed ayey caadi u tahay in la siiyo antibiyootig haweenka dhala ka hor wakhtigii loogu talogaley, xitaa iyada oo aan laga helin GBS mudadii ay uurka lahayd.

Dumarka dhibaatooyin kala soo darsen uurashii hore ee ay qaadeen

Haweenka dhibaatooyin kal soo darsay uurashii ay hada ka hor qaaden, kaas oo laga shikisanyahay in GBS ay qayb ka ahayd dhibkaas, waxaa loo maareeyaa si gaar ah. Waxaa halkan loo baahan kara xanaaneyn gaar ah oo ku haboon, mararka qaarkood waxaa la qaada tijaabooyin dhiig oo badan. Ummulisada ku qaabilsan iyo dhakhtarka daryeelaka hooyada ayaa ku siin doona wixii talo bixin ah.